

Taariiqda: _____

Qaaliga ah _____

Waan jecelnahay in aan kugu haysano WIC. Waan ku weynay balantaada oo ah:

Haka maqnaanin waxyaabaha wanaagsan ee WIC ay bixineyso oo ay ku jiraan jeegaga cuntada nafaqada. Fadlan hadeer soo wac balan. Waxaan sameyneynaa wanaageena aan ku helno waqti adiga kugu haboon.

Muhiim ayaad noo tahay. Fadlan soo wac sida ugu dhaqsiiha badan oo suurtoogalka ah si aad dib ugu balansatid balantaada.

Shaqaalahaaga WIC
Magaca hay'ada iyo lambarka taleefonka:

Waxaad caq u leedahay Dhageysi Cadaalad ah

Haddii aad iska saartid WIC iyo aad umaleysay in ay tani cadaalad daro tahay, weydii Dhageysi cadaalad ah. Shaqaalahaaga WIC ayaa kugu caawinaya helida Dhageysi Cadaalad ama waxaad ka soo wici kartaa gobolka xafiiska WIC 1-800-841-1410. Dhageysiga Cadaalada ah adiga, saaxibkaaga ama qaraabada way sheegi karaan sheekada dhinacaada. Waa in aad ku weydiisaa Dhageysiga Cadaalada 60 maalmood gudaheed ee warqadaan.”

Barnaamijka Nafaqada WIC ma takooro.

Sida waafaqsan sharciga xaquuqda rayidka Federaalka iyo sharciyada xaquuqda rayidka Waaxda Beeraha Mareykanka (USDA) iyo xeerarka, USDA, waa hay'adaha, xafiisyada, iyo shaqaalaha, iyo machadyada ka qeybqaadanayo ama maamulayo barnaamijyada USDA waa ka mamnuuc takoorida ku saleysan jinsiyada, midibka, asalka dhalashada, jinsiga, curyaanimada, da'da, ama aargoosiga ama ka aarsashada ka hor howsha xaquuqda rayidka oo barnaamij walba ama howl la qabtay ama ay maalgelisay USDA.

Dadka curyaanka ee u baahan qaabab kale oo xiriirka ah ee warbixinta barnaamijka (tusaale. Qoraalka dhagoolka, daabacada balaaran, cajalada maqalka, Luuqada Aastaanta Mareykanka, iwm.), waa in ay la xiriiraan Hay'ada (Gobolka ama Maxaliga) meesha ay ka codsadeen faa'idooyinka. Shaqsiyaadka dhagoolka ah, ku adagtahay maqalka ama qaba dhibaatooyinka hadalka waa in ay la xiriirtaa USDA oo dhinaca Adeega Gudbinta Federaalka ee (800) 877-8339. Intaa waxaa dheer, warbixinta barnaamijka waxaa laga yaabaa in lagu diyaariyo luuqado aan ka aheyn Ingiriis.

Si aad u gudbisid cabasho takoor oo barnaamij ah, buuxi Foomka Cabashada Takoorida Barnaamijka USDA, (AD-3027) laga helo onleenka: http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html, iyo xafiis walboo USDA, ama warqad soo qor oo lagu aadinayo USDA iyo warqada ku sheeg dhammaan warbixinta lagu codsaday foomka. Si aad u codsatid koobi foomka cabashada ah, soo wac (866) 632-9992. U soo gudbi foomka oo buuxo ama warqada USDA oo:

Boosto ahaan: Waaxda Beeraha Mareykanka
Xafiiska Caawiyaha Xoghayaha ee Xaquuqda Rayidka
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410

I-meel: program.intake@usda.gov

Fakis: (202) 690-7442

Hay'adaan waa bixiye fursad simman.

Gobolka Washington Barnaamijka Nafaqada WIC ma takooro.

Dadka curyaanka ah, warqadaan waxaa lagu heli karaa codsi ahaan oo qaabab kale ah. Si aad u gudbisid codsi, fadlan soo wac 1-800-841-1410 (TDD/TTY 1-800-833-6388).